:

Qabriga

Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim
Al Quayshiyyi Al Haashimiyyi
Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

عبد الله بن عبد المطلب بن هاشم القرشي الهاشمي
صلى الله عليه وعلى آله الطيبين الطاهرين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون

Waxaa dhigay
Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

بسم الله الرحمن الرحيم

الحمد لله رب العالمين، وصلى الله على سيدنا ومولانا و شفيعنا محمد النبي الأمي وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون، أما بعد

Bukaanka iyo dhimashada Cabdu Allaahi عبد المطلب

Intay dariiqa kusoo jireen ayaa Cabdu Allaahi\ **عبد الله** bukooday, markaasey raggi kale hawdaj/**هودج** rati uga kor dhiseen oo ay sidaas kusoo qaadeen oo ay Al Madiinah**المدينة** keeneen.

Al Xalabiyah**الحلبية** waxay warisay inuu Cabdu Allaahi **عبد الله** asxaabtiisa safarka ku yiri:

أنا أتخلف عند أخوالي بني عدي بن النجار".

Oo Macnihiisu yahay:
"Anigu waxaan ku harayaa reer abtigay Bani Cadiyyi bin Al Najjaar **بني عدي بن النجار** ."
Waa intaas warka Al Xalabiyah**الحلبية** (1/63).

Cabdu Allaahi/ **عبد الله** wuxuu ku degey guriga ninka koofaartiisu tahay Al Naabighah/**النابغة,** magaciisuna yahay Xaarith bin Ibraahiim bin Suraaqata al Cuthriyyi **حارث بن إبراهيم بن سراقة العذري من بني عدي بن النجار**, ee reer Banii Cadiyyi bin Al Najjaar **بني عدي بن النجار** oo aabihiis Cabdu Al Mudh-dhalib\ **عبد المطلب** dhalay oo u reer abti ah.

Reerkaas waxaa u madax ahaa Al Naabighah**النابغة.** Safarka intiisa kale wuxuu soo aaday Makkaah Al Mukarramah**مكة المكرمة,** Cabdu Allaahina **عبد الله** waxay uga soo tageen guriga Al Naabighah**النابغة** isagoo xanuunsan.
Markay Makkah**مكة** yimaadeen oo uu Cabdu Al Mudh-dhalib/ **عبد المطلب** khabarka wiilkiisa Cabdu Allaahi\ **عبد الله** uu gaaray, wuxuu soo xusuustay inuu aabihiis Haashim/**هاشم** dal shisheeye ku dhintay, oo ah Ghazzah/**غزة**, adeerkiis Al Mudh-dhalibna/**المطلب** uu dal shisheeye, oo ah Yaman،**يمن**, ku dhintay, adeerkiis Nawfalna**نوفل** uu isagoo qariib ah arliga Ciraaq/**عراق** ku dhintay, wuxuuna is weydiiyay: "Cabdu Allaahina **عبد الله** ma isagoo qariib ah ayuu Yathrib/**يثرب** ku dhiman doonaa?"

Markaasaa waxaa Cabdu Al Mudh-dhalib\ **عبد المطلب** u yimid wiilkiisa Al Zubayru/**الزبير** oo ku yiri:
"Cabdu Allaahi\ **عبد الله** meeyey?"
Wuxuu Cabdu Al Mudh-dhalib/ **عبد المطلب** ku yiri:
"Wuxuu ku haray reer abtigiisa Yathrib**يثرب".**
Al Zubayru\ **الزبير** wuxuu yiri:
"Muxuu Safarka ula soo noqon waayey?"
Cabdu Al Mudh-dhalib\ **عبد المطلب** wuxuu yiri:
"Halkaas ayuu ku bukaa, Al Xaarith/**الحارث** ayaanna dirayaa inuu walaalkiis soo celiyo."

Markaasuu Al Zubayru\الزبير wuxuu yiri:
"Bal anigaa safrayoo soo celinaya."

Sidaas ayuu Al Zubayru\الزبير Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة ugu safray si uu walaalkiis Cabdu Allaahi\عبد الله usoo qaado.
Waxaa kaloo la yiri waxaa Al Madiinah\المدينة u safray si uu Cabdu Allaahi\عبد الله usoo celiyo walaalkiis Al Xaarith\الحارث.

Al Zubayr\الزبير, ama Al Xaarith\الحارث wuxuu yimid Al Madiinah\المدينة isagoo uu Cabdu Allaahi\عبد الله dhintay, kaddib markuu bil halkaas ku jirranaa, laguna xabaalay daarta Al Naabighah\النابغة.

Al Zubayr\الزبير Makkah\مكة ayuu kusoo laabtay.
Markuu khabarka dhimashada Cabdu Allaahi\عبد الله Makkah\مكة soo gaaray, waa laga wada naxay, waxayna dadku is waydiiyee:
"Maxay tartay in boqol halaad oo geel ah lagu furtay hadduu in yar kaddibba dhimanayo?"

Xikmada furashadiisa iyo dhimashadiisa ku jirta waxaase garaty Ruqayyata bintu Nawfal رقية بنت نوفل\, oo nafteeda isku tiri:
"Cabdu Allaahi\عبد الله waxaa boqol halaad oo geel ah loogu furtay inuu noolaado oo uu Aaminatu bintu Wahab\آمنة بنت وهب guursado, oo uu la gogol galo uuna ku wareejiyo oo ku ammaaneysto, ugana tago nuurkii wajigiisa ka kaahayay."

Dhaxalka Cabdu Allaahi\عبد الله

Cabdu Allaahi\عبد الله wuxuu ka dhintay shan halaad oo geel ah, gabar addoon ah oo xabashiyad ah, magaceeduna yahay Barakatu bintu Thaclab bin Xusayn/بركة بنت ثعلبة بن حسين بن مالك (waa saad aan dhibic lahayn) bin Maalik (Sidaas ayuu magaceeda oo dhan ugu xusay, mujalladka koowaad, bogga boqol toddoba iyo sideetan, kitaabkiis Taariikhu Al Khamiis تاريخ الخميس/ Qaalligii Makkah magaciisuna ahaa Al Imaamu Al Shaykh Xusayn bin Muxammad bin Al Xasan Al Diyaarbakrii/القاضي الأمام الشيخ حسين بن محمد بن الحسن الدياربكري, dhintayna sanadka sagaal boqol lix iyo lixdanka Hijrada).
Barakatu\بركة, oo ah hooyada dhashay Usaamah bin Zayd bin Xaarithah/أسامة بن زيد بن حارثة, Allaha raalli ka wada noqdee, koofaarteedu wuxuu ahaa Ummu Ayman/أم أيمن, oo wiilkay Usaama hortiis dhashay ayaa la oran jiray Ayman/أيمن, oo saxaabi ahaa, Allaha raalli ka noqdee. Ummu Ayman\أم أيمن waxay dhimatay khilaafada Cuthmaan bin Caffaan/عثمان بن عفان, Allaaha raalli ka noqdee.
Cabdu Allaahi\عبد الله wuxuu kaloo ka dhintay xoogaa ari ah. Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa Ummu Ayman\أم أيمن iyo shanta halaad oo geela ah iyo arigaba aabihiis ka dhaxlay.

Meesha lagu duugay Cabdu Allaahi\عبد الله

Reer Cadiyyi bin Al Najjaar**بني عدي بن النجار** waxay Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** ka degganaayeen daarohoodii la yiqiinnay oo Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga galbeedka ka xigay. Guryohoodu waxay ku yiilleen oo ay taxnaayeen galbeedka Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga bilaabo xagga waqooyigiisa ilaa koofurtiisa iyo ilaa Masjidka la yiraahdo Masjidu Al Ijaabah/**مسجد الإجابة**, kaasoo geeska barxadda lagu tukado ee Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maanta u jira shan boqol iyo sideetan mitir.

Guryaha Ansaarta waxaa ugu khayr badan guryaha Banuu Al Najjaar" خير دور الأنصار بنوا النجار/

Guryahaas inta la dumiyay markii Masjidka la ballaarinayay ayaa dhulkooda Masjidka lagu daray. Daar waa guryo badan oo hal darbi wadaaga oo uu ku wada wareegsan yahay. Daartaas reer Banii Cadiyyi bin Al Najjaar**بني عدي بن النجار** waxaa ku dhex yiillay guri afar geesood leh oo wayn, oo Masjidkooda isla daartaas ku dhex yiillay, xagga Qiblada ka xigay. Gurigaas waxaa loo yiqiinnay Adhamu Al Zaahiriyyata/**أطم زاهرية**, oo ah magaca haweeney gurigaas degganayd. Guriga ninka koofaartiisu tahay **Al Naabighah/النابغة**, magaciisuna yahay Xaarith bin Ibraahiim bin Suraaqata al Cuthriyyi oo reer Banii Cadiyyi bin Al Najjaar**بني عدي بن النجار** madaxa u ahaa wuxuu ku yiillay Masjidka daartaas ku dhex yiillay agtiisa.
Waxaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga wariyay inuu yiri:

"خير دور الانصار بنوا النجار، ثم بنوا عبد ألأشهل."

"Khayru duuri al Ansaari Banuu Al Najjaar, thumma Banuu Cabdu Al Ash-hal."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Daaraha Ansaarta waxaa ugu khayr badan daaraha reer Banii Al Najjaar**بني النجار** -ujeedaduna waa dadka guryahaas iyo daarahaas deggan ee ma aha guryaha dhagaxda ah laftooda-, waxaana ku xiga Kuwa Banuu Cabdu Al Ash-hal**بنو عبد الأشهل**."

Reer Banii Al Najjaar**بني النجار** waa jilib ka mid ah qabiilka Al Khazraj/**الخزرج**, reer Banii Cabdu Al Ash-halna/**بني عبد الأشهل** waa jilib ka tirsan qabiilka Aws/**أوس.**

Kala fiicnaantaasi waa siday islaamidda ugu kala horreeyeen iyo siday ugu kala dheereeyeen inay Kalimadda Ilaahay midda sarreysa ka yeelaan: sidaas waxaa u fasiray Al Sh-ariif Al Samhuudii/**الشريف السمهودي** , kitaabkiisa Wafaa'ul Wafaa'/**وفاء الوفاء,** mujalladka koowaad, bogga laba boqol afar iyo toban.

Ninkay reer Banii Al Najjaar**بني النجار** ku abtirsadaan oo la yiraahdo Al Najjaar**النجار,** magaciisu waa Taymu Allaahi bin Thaclabah bin Camr bin Al Khazraj**تيم الله بن ثعلبة بن عمروا بن الخزرج**, waxaana Al Najjaar/**النجار** loogu bixiyay isagoo gacantiisa oo isku duuban uu feer ama bir uu gacanta ku qabsaday nin kale wajiga uga dhuftay, oo uu sidaas wajigiisa ku dillaaciyay. Farsamayaqaanka alwaaxda ka shaqeeya waxaaba najjaar**نجار** loo yiraahdaa isagoo alwaaxda jeexa, oo najara**نجر** macneheedu waxaa weeye waa gooyey.

Daarta Al Naabighah\دار النابغة

Marka, Cabdu Allaahi\عبد الله waxaa lagu duugay daarta Al Naabighah**النابغة,** daartaasna wuxuu uga duugan yahay guriga labaad xakabadda hoosteeda. Gurigaasna wuxuu bidixda ka qabanayaa qofka irridda daydka wayn kasoo gala. Daartaas dhexdeeda waxaa ku yiillay, sidaan usoo sheegnay Masjid.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuu ku tukaday Masjidkaas, wuxuuna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tukaday daarta Al Naabighah**النابغة.** Wuxuu kaloo, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku qubaystay Masjidka reer Banii Cadiyyi/**بني عدي.** Waxaa halkaas ka cad inay daartaas dhexdeeda ku yiilleen laba Masjid oo kala ah Masjidka daarta Al Naabighah **النابغة** iyo Masjidka la yiraahdo Masjidu Banii Cadiyyi/**مسجد بني عدي,** Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu labadoodaba ku tukaday, midkoodna uu ku qubaysta oo ah Masjid reer Banii Cadiyyi**بني عدي.** Wuxuu kaloo Nabigu. Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tukaday guri kale oo daartaas isaguna ku yiillay uuna lahaa ninka la yiraahdo Sirmata/**صرمة**, siduu ugu wariyay Al Samhuudii/**السمهودي** kitaabkiisa Wafaa'ul Wafaa'**وفاء الوفاء** Juzka saddexaad, bogga sideed boqol toddoba iyo lixdan.

Masjidu Al Ghamaamah/Masjidu Al Musallaa\مسجد الغمامة
مسجد الغمامة/مسجد المصلى

Waxaa kaloo Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga galbeed ka xigay bar ka mid ah meeluhuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Salaadda Ciidaha ku tukan jiray, barahaasoo kaddib Masaajidyo laga dhisay, oo Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Salaadaha Ciidda Masjidkiisa kuma tukan jirin ee wuxuu Asxaabtiisa ku tujin jiray bannaanka.
Meeshaas waxaa la yiraahdaa Al Musallaa/**المصلى,** masaajidyada ka dhisanna waxaa ka mid ah masjidka la yiraahdo Masjidu Al Ghamaamata/**مسجد الغمامة** ama Masjidu Al Musallaa **مسجد المصلى/**. Masjidkaas wuxuu Baabu Al Ssalaamu/**باب السلام** ee Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u jiraa shan boqol oo mitir, darafta saaxadda lagu tukado ee Masjidkana u jiraa saddex boqol iyo shan mitir, siduu Dr. Muxammad Ilyaas Cabdul Ghanii **د/محمد إلياس عبد الغني/** ku wariyay bogga laba boqol laba iyo soddon ee kitaabkiisa Al Masaajidu Al Athariyyatu Fii Al Madiinati Al Munawwarati /**المساجد الأثرية في المدينة المنورة** ku wariyay.

Dr Khaalid Muxammad Xaamid/**د/خالد محمد حامد** wuxuu kitaabkiisa Thikraa mina Al Madiinah Al Munawwarah/**ذكرى من المدينة المنورة** boggiisa boqol iyo lix iyo soddon ku wariyay in Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga wariyay inuu yiri:

"ما بين مسجدي إلى المصلى روضة من رياض الجنة ومنبري على حوضي."

"Maa bayna Masjidii ilaa al Musallaa Rawdatun min Riyaadi al Jannati wa Minbarii calaa Xawdii."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Inta u dhexeysa Masjidkeyga iyo Al Musallaa**المصلى** waa beer beeraha Jannada ka mid ah, Minbarkeyguna wuxuu ku kor yaalla Xawdkeyga**حوضي.**" Kutubbo kale oo bandanna waa wariyeen.

Xawdku/**الحوض** waa Wabi maalinta qiyaame meesha la isku shirinayo ku yaallaa oo uu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay kaasoo ka waraabinaya maalintaas kulaylka iyo harraadka badan muslimiinta. Xadiithkaan wuxuu Al Sayuudhii/**السيوطي** ku wariyay kitaabkiisa Tanwiiru Al Xawaaliki/**تنوير الحوالك** mujalladka labaad bogga boqol lix iyo konton. Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Wafaa'u Al Wafaa**وفاء الوفاء** iyo kuwo kaleba.

Al Jazaa'irii: qabriga Cabdu Allaahi/الجزائري:قبر عبد الله

Abii Bakar Jaabir Al Jazaa'irii/**أبي بكر جابر الجزائري,** Waacithka/**الواعظ** Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu kitaabkiisa Haathaa Al Xabiibu Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam Yaa Muxibbu **هذا الحبيب محمد رسول الله صلى الله عليه وسلم يا محب**/, oo kun sagaal boqol shan iyo sagaashan la daabacay, bogga lix iyo afartanaad ku yiri:

"Cabdu Allaahi**عبد الله** wuxuu ku dhintay guryaha reer abtigiis reer Banii Cadiyyi bin Al Najjaar **بني عدي بن النجار**, qabrigiisuna meeshuu ku yaallo waa la yaqaannaa oo waa macruuf. Dhowaan ayaa la qariyay si ayan usoo booqan kuwa jaahiliinta ah, amaba ayan ka shafeeco doonan."

Ninka Masjidka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka salaadda ku tujiya Imaam lama yiraahdo, sida kuwa dadka ku tujiya masaajidyada kale. Sababtu waxaa weeye inuusan ninna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, imaam u noqon karin, isagoo uu Nabigu Sallaa Allaahu Caleyhi Wasallam, nool yahay oo uu qolkiisa Masjidkiisa ku yaaalla deggan yahay. Sidaas ayaa waxaa qofkaas loo yiraahdaa Waacith/**واعظ,** oo ah midka dadka wacthiya, ama Khadhiib/**خطيب**, oo ah midka khudhbada Jimcaha jeediya.

Qabriga Cabdu Allaahi**عبد الله** maanta

Maalinta Jimcaha ah, taariikhduna tahay sagaalka bisha Safar ee sanadka Hijrada ee kun iyo afar boqol iyo shan, una dhigantah maalinta labaad ee bisha Noovembar ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo iyo afar iyo sideetan waxaa la dhigay dhagaxa ballaarinta Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة,** mashruucaas oo loo yaqaanno Ballaarinta Sucuudiga ee Labaad, siduu Dr. Muxammad Ilyaas Cabdu Al Ghanii ku xusay kitaabkiisa Taariikhu Al Masjidi Al Nabawii Al Shariifi/**تاريخ المسجد النبوي الشريف.**

Markaasaa waxaa ay Dawladda Sucuudigu gadatay daaraha Masjidka ku hareereysan, si inta loo dumiyo dhulkooda Masjidka lagu daro oo lagu ballaariyo. Markaasey waxay gadatay saddex boqol iyo sagashan guri, siduu u wariyay kitaabka ay dhigtay shirkaddii hawlahaas ballaarinta meel marisay ee la yiraahdo "Story of the Great Expansion", ayna dhigtay shirkadda sucuudiga ah ee la yiraahdo Saudi Bin Ladin Group, boggiisa saddex boqol iyo labo iyo toddobaatan. Guryaha la dumiyay waxay Masjidka ka xigeen, siduu isla kitaabkaas boggiisa saddex boqol iyo kow toddobaatanka ku xusay xagga waqooyiga, qorrax kasoo bax iyo qorrax u dhacba. Guryahaas waxaa ka mid ah guriga uu ku yaallo qabriga Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib/**عبد الله بن عبد المطلب**, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabihiis, oo Masjidka dhanka qorrax u dhac ka xigay.

Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib Al Haashimiyyi\عبد الله بن عبد المطلب الهاشمي
wuxuu ka mid yahay Ahlu Al Baytka/أهل البيت

Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim**عبد الله بن عبد المطلب بن هاشم** wuxuu ka mid yahay Ahlu Al Bayti**أهل البيت,** sidaan ku arki doonno markaan warinaynno warka Al Imaamu Al Sh-shaaficii/**الأمام الشافعي** oo caddeynaya kuway yihiin Ahly Al Bayti**أهل البيت** inshaa'a Allaahu Tacaalaa**إن شاء الله تعالى.**
Nabi Muxammadna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu Ilaahay Tacaalaa **الله تعالى** ka baryay inuu Ahlu Al Baytkiisa**أهل البيت** jannada geliyo oo uusan naar gelin, sidaan hoos ku arki doonno Xadiithka uu ibnu Abii Shaybah/**إبن أبي شيبة** ka wariyay Ummu Salamah **أم سلمة/** inshaa'a Allaahu. Sidoo kale tafsiirka laga wariyay ibnu Cabbaas**إبن عباس** ee

وَلَسَوْفَ يُعْطِيكَ رَبُّكَ فَتَرْضَى (5)

"Walasawfa yucdhiika Rabbuka fa tardaa" ee Suuratu Al Dduxaa**سورة الضحى.**

Al Shariifu Al Khayyaarii\الشريف الخياري

Kitaabka magaciisu yahay Taariikhu Macaalimi Al Madiinah Al Munawwarah Qadiiman wa Xadiithan/**تاريخ معالم المدينة المنورة قديما وحديثا,** uuna dhigay Al Sayyid Axmad Yaasiin Axmad Al Khayyaarii Al Madanii Al Azharii Al Xusaynii **السيد أحمد ياسين أحمد الخياري المدني الأزهري الحسيني/,** oo ka mid ah dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, la oofsadayna toddoba iyo tobanka bisha Rajab ee sanadka kun iyo saddex boqol iyo sideetanka Hijriga, wuxuu caalinka faallada ku daray iyo wixii cusbaa ee geerida dhigaha kitaabka ka dambeysey magaciisuna yahay Al Istaath Cubaydu Allaahi Muxammad Amiin Kurdii **الأستاذ عبيد الله محمد امين كردي/,** oo macallin ka ah Jaamacadda Al Kulliyah Al Mutawassidhah li icdaadi Al Mucallamiina**الكلية المتوسطة لإعداد المعلمين** bi Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة,** ahna Jaamacadda Macallimiinta soo saarta, wuxuu bogga lix iyo soddon ku yiri:
"Banuu Maalik bin Al Najjaar/**بنوا مالك بن النجار** waxay deganaayeen meesha lagu duugay Cabdu Allaahi, Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam aabihiis, lana yiraahdo Zuqaaq Al Dhuwaal/**زقاق الطوال** (Zuqaaq waa dariiqa yar oo ciriiriga ah) ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة**".
Al Khayyaarii**الخياري** wuxuu kitaabkiisaan ku yiri: "Ibnu Shubbah/**إبن شبهة** wuxuu Yaxyaa bin Al Nadr/**يحيى بن النضر** ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku tukaday Masjidka ku yiillay Daarta Al Naabighah**دار النابغة;** riwaayad kalena inuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku qubaystay Masjidka Banii Cadiyyi**مسجد بني عدي.**

Daarta Al Naabighahn\a**النابغة** waa midda uu Ibnu Shubbah**إبن شبه** wariyay inuu dhexdeeda ku yaallo qabriga Cabdu Allaahi**عبد الله** , Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabihiis, waxaana muuqata inay Daarta Banii Cadiyyi ku taallo galbeedka Masjida, kuna xigto Banii Jadiilah/**بني جديلة,** ayadoo uu Al Nadr/**النضر,** Anas/**أنس** aabihiis reer Banii Cadiyyi u dhashay, waxaanna arki doonnaa markaan ceelasha ka hadlaynno inuu ceelka daartiisu halkaas ku yiillay".

(Ceelkaan iyo Daartiisaba waxaa lagu soo daray Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam).
Ninka faallada ku darayna wuxuu yiri:
"Bartaan (uu ku yaallo qabriga Cabdu Allaahi\عبد الله, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabihiis) waxaa lagu soo daray dhinaca qorrax u dhac ee Masjida Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Sharafta leh, marka galbeeka loo ballaariyay".

Wuxuu bogga boqol iyo saddex iyo konton ku yiri, isagoo ka faalloonaya Masjidka Reer Banii Cadiyyi bin Al Najjaar\بني عدي بن النجار ama Masjidu Daaru Al Naabighah fii Banii Cadiyyi مسجد دار النابغة في بني عدي\:

"Wuxuu ku yiillay bartamaha Al Zuqaaqu\الزقاق - oo ah dariiqa ciriiri ah - oo la oran jiray Zuqaaqu Al Dhuwaali زقاق الطوال , bartaasuna hadda waxay dhex gashay ballaarinta Sucuudiga ee Masjidaka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam."

Kitaabkaan waxaa lagu daabacay Madhbacada la yiraahdo: Madhaabic Mu'assasatu Al Madiinah lil Saxaafah (Daaru Al Cilmi)/مطابع مؤسسة المدينة للصحافة (دار العلم ee ku taalla Jiddah/جدة, tanna waa dhabcada afaraad ee la daabacay sanadka kun afar boqol iyo afar iyo toban, una dhigantah kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo sagaashan.

Cabdu Allaahi\عبد الله wuxuu ku duugan yahay Masjidka wiilkiisa Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dhexdiisa dhankiisa qorrax u dhac

Sidaas ayuu Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد الله بن عبد المطلب, aabaha dhalay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku duugan yahay Masjidka wiilkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo hal saqf ayay ku wada hoos noolyihiin, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu dhanka qorrax kasoo bax ka deggan yahay, aabihiisna dhanka galbeed iyo qorrax u dhac uga duugan yahay.

Sidaasuu Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib/عبد الله بن عبد المطلب ugu jiraa Jannada ugu sarreysa oo ugu fiican oo ah Al Wasiilatu/الوسيلة oo ah barta ugu sarreysa Firdawsa/فردوس oo ah degmada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam inshaa'a Allaahu.
Mashruuca ballaarinta Masjidka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa la gunaanaday maalinta Jimcaha ah ee maalinta afaraad ee bisha thul Qacdah\ذوالقعدة ee sanadka kun iyo afar boqol iyo afar iyo toban Hijrada, una dhigantah maalinta shan iyo tobnaad ee bisha Abriile ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo afar iyo sagaashan.

Barashadiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dabaasha iyo ragga yuhuudda ah ee Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة

Aaminah bintu Wahb\آمنة بنت وهب wiilkeeda Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxay sanad walba mar geyn jirtay Al Madiinah Al Munawwarah المدينة المنورة\ si uu qabriga aabihiis usoo arko. Markay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة tagtay, Aaminah\آمنة waxay reer abtigiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam –waana reer abtiga

awoowihiis Cabdu Al Mudh-dhalib/**عبد المطلب**-, la joogtay bil, Nabiguna, Sallaa Allaahu Calahi Wasallam, wuxuu xusi jiray umuuro uu la kulmay bishaas uu sidaas Al Madiinah**المدينة المنورة** ku joogay.

Qisadaanna waa marka ugu dambeysey oo ay Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** geysey Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam isagoo lix sano jira, ayaduna markay lasoo gaddoonto si ay Makkah**مكة** ugu noqoto ayay dhimatay, laguna aasay tuulada la yiraahdo Al Abwaa'/**الأبواء** oo uu ilaa maanta qabrigeedu ku yaalla oo la yaqaannaa,

Hijrada kaddib, markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Al Madiinah soo degay, ayuu intuu daartaas fiiriyay ayuu wuxuu yiri:

"ههنا نزلت بي أمي."

"Haa hunaa nazalat bii Ummii",
oo macnihiisu yahay:
"Halkaan ayay hooyaday ila degtay."

Riwaayad kalena waxay leedahay inuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"وفي هذه الدار قبر أبي عبد الله وأحسنت العوم في بئر بني عدي بن النجار، وكان قوم من اليهود يختلفون، ينظرون إلي. قالت أم أيمن فسمعت أحدهم يقول "هو نبي هذه ألأمة، وهذا دار هجرته." فوعيت كله من كلامهم."

"Wa fii haathihi al daari qabru abii Cabdu Allaahi". **"Wa axsantu al cawma fii bi'ri Banii Cadiyyi bin Al Nnajjaar, wa kaana qawmun min al yuhuudi yakhtalifuuna, yanthuruuna ilayya. Qaalat Ummu Ayman: fa samictu axaduhum yaquulu: Huwa Nabiyyu haathihi al Ummah, wa haathaa daaru hijratihi. Fa wacaytu kullahu min kalaamihim"**.
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Daartaanna waxaa dhexdeeda ku yaalla qabriga aabahay Cabdu Allaahi**عبد الله**, aanna dabaasha si fiican ugu bartay ceel ay leeyihiin reer Banii Cadiyyi bin Al Najjaar**بني عدي بن هانجار**. Rag yuhuud ahna way isku kay dhaafi jireen oo ay fiirada igu soo celcelin jireen.

Ummu Ayman**أم أيمن** waxay tiri:
"waxaanna maqlay midkood oo oranaya:
"isagu waa Nabiga Ummaddaan, magaaladaanna waa magaalada uu usoo haajiri (qaxi) doono."
Markaasaan intaas kulli aan hadalkooda ka weeleeyey (oo aan qalbiga ku qabtay oo ku xifdiyay)".
Sidaas ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabaasha u bartay, isagoo aan weligiis bad tegin.
Ceelasha Madiinana**المدينة** way gaagaaban yihiin qaarkood, afna ballaaran yihiin.
Al Sayuudhi/**السيوطي** wuxuu yiri: Abuu Al Qaasim Al Baghawii/**أبو قاسم البغوي** iyo Ibnu Casaakir/**إبن عساكر** iyo Ibnu Shaahiin/**إبن شاهين** waxay Ibnu Cabbaas/**إبن عباس** ka wariyeen inuu yiri:
"Isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo asxaabtiisa ayaa waxay ku dabasheen durdur , markaasuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

" ليسبح كل رجل إلى صاحبه."

"La yasbax kullu rajulin ilaa saaxibihi"
oo macneheedu yahay
"Nin walba xagga saaxiibkiis ha u dabaasho".
Markaasuu isagu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, xagga Abuu Bakar\أبو بكر u dabaashay oo uu markuu u tegey uu luqunta luqunta u suray, uuna yiri:

"أنا وصاحبي ،أنا وصاحبي."

"Anaa wa saaxibii, anaa wa saaxibii"
oo macneheedu yahay
"Aniga iyo saaxiibkay, aniga iyo saaxiibkay".

Kaddib hooyadiis waxay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ula soo gaddoontay Makkata Al Mukarramati\مكة المكرمة si dhakhso leh, cabsi ay uga qabto yuhuudda.

Al Zarqanii/الزرقاني wuxuu wariyay riwaayada Abuu Nucaym/أبو نعيم oo yiri:
“Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"فنظرإلي رجل من اليهود يختلف ينظر إلي فقال يا غلام ما إسمك؟ قلت أحمد، فنظرإلى ظهري فأسمعه يقول "هذا نبي هذه الأمة"، ثم راح إلى إخوانه فأخبرهم. فأخبروا أمي فخافت علي، فخرجنا من المدينة."

“fa nathara ilayya rajulun mina al yahuudi yakhtalifu yanthuru ilayya, fa qaala: “yaa ghulaam maa ismuka?” "Qultu Axmad, wa nathara ilaa thahrii fa asmacuhu yaquulu: "haathaa Nabiyyu haathihi al ummati", thumma raaxa ilaa ikhwaanihi fa akhbarahum. Fa akhbaruu ummii fa khaafat calayya, fa kharajnaa mina Al Madiinah".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Markaasaa waxaa i fiiriyay nin yuhuudda ka mid ah, oo uu fiirada uu i fiirinayo ku celceliyay. Markaasuu wuxuu yiri:
"Wiilow magacaa?"
Waxaan iri Axmad\أحمد. Markaasuu dhabarkeyga fiiriyay. Kaddibna waxaan maqlay isagoo oranaya: "Midkaani waa Nabiga Ummaddaan". Kaddibna wuxuu ku laabtay walaalihiis oo uu u sheegay. Markaasaa hooyaday loo sheegay. Markaasey intay ii baqday ayaan Al Madiinah\المدينة ka dhoofnay". Waa intaas warka Abuu Nucaym/أبو نعيم .

Qiridda yuhuudda inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Nabiga ummaddaan yahay

Ragga yuhuudda ah oo uu ninkaas ayaga ka mid ahi hadalkaas u jeediyayna way u qireen oo ay sugeen inuu sidaas yahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabiga ummaddaan, oo kuma ayan inkirin, kuma ayan diidin. Markaasey hooyadiis, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markay tuulada Al Abwaa’/الأبواء la yiraahdo la marayso, ayaa halkaas geeridii ugu timid oo lagu oofsaday, laguna duugay.

Sidaasay noogu dhammaatay qaybtaan ee kitaabkaan wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina wa Sallaa Allaahu calaa Sayyidinaa wa Mawlaanaa Muxammadin Wa Calaa Aalihi Wa Sallam tasliiman kathiiran kullamaa thakarahu al th-thaakiruuna wa ghafala can thikrihi al ghaafiluuna.

Walaaladay Xaajji Cabdu Al Qaadir Nuur Cismaan Cilmi (bidixdaada) iyo Xaajji Cabdu Al Rrizaaq Sheekh Cumar Cismaan Cilmi oo hortaagan Guuriguu ku Dhashay Nabi MUxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Xasanwali toddoba iyo labaatanka Thuu Al Qacdah kun afar boqol laba iyo soddon Hijriga, una dhiganta shan iyo labaatanka Oktoobar laba kun kow iyo toban miilaadiga.

333

Guriga bidixda kaa qabanayaa oo shan shabaako uga jeedid kana soo horjeeda Baabu Al Ssalaam**باب السلام** ee Xaramka waa guriguu ku dhashay Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Xasanwali.



Naqshadda guriga Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib**عبد الله بن عبد المطلب**, guriguu ku dhashay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Al Xaarithii**الحارثي** 1432H/2011. Xasanwali.

Guriguu ku dhashay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam gudihiisa maanta. Xasanwali 1433H./2011M.

Bartuu ku dhashay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxay ku beegan tahay qiyaas darafta bidix ee miiskaas, wa Allaahu Aclamu\والله أعلم. Xasanwali 1433H/2012M.

.

Qubbadda cagaaran hoosteeda waa Guriga Caa'ishah\عائشة, halkaasoo uu ku nool yahay Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuuna ku yaalla dhanka qorrax kasoo bax ee Masjidka. Dhanka qorrax u dhacna waxaa deggan Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalibعبد الله بن عبد المطلب, Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam aabihiisa dhalay.

غزوة بني قينقاع مختصرة شمال من السنة الثانية للهجرة
بداية جبل أحد
بنو الحارثة
النبيت
بنو عبد الأشهل وزعوراء
اللابة الشرقة
(حرة واقم)
بنو ظفر
بنو الحارث من الخزرج
السُنح
بنو النجار
البقيع
الهجوم الإسلامي على بني قينقاع
جبل سلع
بنو زريق
بنو واقف
بنو الحارث
بنو قينقاع
وادي بطحان
وادي مهزور
بعاث
بنو سالم بن عوف
بنو قريظة
القواقلة
وادي العقيق
بنو النضير
بنو عوف بن الخزرج
أطم كعب بن الأشرف
بنو عوف بن مالك
مسجد قُباء
جبل عير

الأطلس التاريخي لسيرة الرسول صلى الله عليه وسلم ل-سامي بن عبد الله المغلوث – صفحة: 161

Boggiisa 161: arag inay guryaha Banii Al Najjaar **بني النجار** galbeedka Masjidka ku yaallaan.


■ المقياس : يمثل طول هذا المصور : ٢٩٢٥ متراً
الجرف
بنو حارثة
إلى مجمع الأسيال
العرصة
وادي قناة
بنو عبد الأشهل وزعوراء
السافلة
النبيت
ثنية الوداع
ثنية النور
بنو ظفر
حرة واقم (اللابة الشرقية)
بنو سلمة
رأس الثنية
البدائع
بنو الحارث من الخزرج
السنح
مسجد رسول الله ﷺ
بنو النجار (مالك ومازن ودينار وعدي)
البقيع
جبل سلع
وادي بطحان
حرة وبرة (اللابة الغربية)
بنو زريق
بنو واقف
بنو ساعدة
بنو الحارث بن الخزرج
بنو قينقاع
بنو بياضة
وادي مهزور
بنو سالم بن عوف
بنو قريظة
جبل بني عبيد
جبل حُمادات
وادي العقيق
وادي مذينب
العالية
بنو النضير
بنو عوف بن الخزرج
أطم كعب بن الأشرف
العصبة
وادي رانوناء
بنو عوف بن مالك بن أوس
مسجد قُباء
قُبـاء
من مكة المكرمة
بنو أنيف
جبل عير
مَسْـجِدُ قُبَـاء
﴿ لا تَقُم فيه أبداً لمسجدٌ أُسِّسَ على التَّقوى من أوَّلِ يومٍ أحقُّ أن تقومَ فيه فيه رجالٌ يحبُّون أن يتطهَّروا وَاللَّهُ يحبُّ المُطَّهِرِينَ ﴾
(التوبة ٩/١٠٨)

أطلس السيرة النبوية للدكتور شوقي أبو خليل صفحة : 77

Bogga 77 wuxuuna ku tusayaa inay guryaha Banii Al Najjaar**بنوالنجار** galbeedka masjidka ku yiilleen.

خريطة ٤٢


مقياس الرسم ١:١٣٠٠٠
الغابة
مجتمع الأسيال
زغابة
بئر رومة
العقيق (الأصغر)
جبل عينين
جبل أحد
الوطاء
الجرف
بنو حارثة
وادي القناة
العرصة
المذاد
النبيت
راتج
السافلة
بنو عبد الأشهل وزعوراء
بنو ظفر
أطما الشيخين
ثنية الوداع
ثنية النور
جبل ذباب
بنو سلمة
رأس الثنية
وادي العقيق
بنو الحارث من الخزرج
السنح
البدائع
مسجد السيق
حسيكة
جبل سلع
مسجد الفتح
مسجد الرسول (صلى)
بنو النجار
حرة واقم (اللابة الشرقية)
البقيع
حرة وبرة (اللابة الغربية)
بنو زريق
بنو واقف
بنو الحارث أو بلحارث
خربى
جبل بنى عبيد
بنو ساعدة
بنو بياضة
بنو الحبلى
أوس مناة
وادي مهزور
بعاث
وادي مذينب
جبل حمادات
بنو جحجبا
العالية
عوسا
بنو عوف
أطم كعب بن الأشرف اليهودي
الجعادرة
العصبة
أطم الضحيان
بنو عوف بن مالك بن الأوس
مسجد قباء
جبل عير
بنو أنيف
أطم شنيف
خريطة
المدينة المنورة
قبائل ومواقع
عند هجرة الرسول صلى الله عليه وسلم
وقد وضعنا على الخريطة
أوائل المساجد التى بنيت فى
العصر النبوى الشريف

خريطة ٤٣



خريطة

تبين خط سير رسول الله

(صلى الله عليه وسلم)

عند انتقاله من قباء إلى منازل بني مالك بن النجار حيث نزل في دار أبي أيوب خالد الأنصاري حتى بنى مسجد الرسول (صلى الله عليه وسلم)

Atlas Taareekhe Al Islaam\أطلس تاريخ الإسلام by Dr. Husayn Mu'nas\د\حسين مؤنس
Ayna daabacday Al – Zahraa for Arab Mass Media in Cairo Egypt\الزهراء للعالم العربي
Boggiisa 42 iyo 43: arag inay guryaha Banii Al Najjaar\بني النجار galbeedka masjidka ku yiilleen.

Midigtaada waxaa ah daartuu ku yiillay qabriga Sayyidinaa Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib\سيدنا عبد الله بن عبد المطلب Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ee "Daaru Al Naabighah دار \النابغة". Masawirka waxaan kasoo qaadannay (http://atharislam.wordpress.com/page/55/).

Qabriga sayyidkeenna Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib\عبد الله بن عبد المطلب
(aabaha dhalay Nabi Muxammad صلى الله عليه وعلى آله وسلم)

Masawir Qabriga Sayyidkeenna Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalibعبد الله بن عبد المطلب
صلى الله عليه وسلم



Masawir Qabriga Sayyidkeenna Cabdu Allaahi bin Cabdu Al Mudh-dhalib**عبد الله بن عبد المطلب**
صلى الله عليه وسلم

Waxaan kasoo qaadannay (www.ahlanpk.org/madina.html) ama (www.ahlanpk.orgm26.html).

وآخر دعواهم أن الحمد لله رب المالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا و شفيعنا محمد النبي الأمي وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون

Dr. Xasanwali Sheikh Xusen Cismaan.